Soomaali |Soomaali

**Maajo 2026**

homes victoria

**DHISMAHA GURYAHA EE WEYN**

# Waqooyiga Melbourne

Wixii ku soo kordhay Bulshada




## Waxa ka socda goobta

### Shaqo ayaa waxay ka socotaa 33 Alfred Street

Waxyaabaha aan loo baahnayn oo la saarayo iyo sidoo kale in guryaha la faaruqiyay laga dhigo meel ammaan ah

### Dabaaldegyada Bulshada ee xaflada Ciida

Boqolaal dadka deegaanka ah ayaa isugu yimid bishii Maarso si ay u damaashaadaan maalin la wada baashaalayay

### Waad ku mahadsan tihiin sida aad noola wadaagteen waxa muhiimada idiin leh

Fikradihii ay nala soo wadaageen dadka dib-udejinta loo suubiyay waxay naga caawisay inaan xilli hore wax sii qorsheyno

Si fiican ayaa loogu damaashaaday xafladdii Ciidda ee la qabtay bishii Maarso

Homes Victoria waxay qiraysaa in dadka Aboriginal-ka iyo Torres Strait Islander-ay yihiin Mas'uuliyiintii dhaqanka ee dhulka waxayna u mahadcelinayaan isla markaasna ixtiraam u muujinayaan Odayashoodii, hore iyo kuwa hadda noolba.

## Way mahadsan yihiin dadka goobta degan ee kasoo qeybgalay kuwaas oo kor u dhaafay 300 oo qof

Bishii Febraayo waxaan xog-ururin ku samaynay dadkii dib-u-dejinta loo sameeyay si aan wax badan uga ogaano taageerada aan siin karno iyo inay naga caawiyaan qorsheyn aan xilli hore sii sameyno.

**Waxaan helnay ra'yi wanaagsan oo ku saabsan:**

- Muhiimadda amniga, badbaadada iyo goobta guryaha cusub
- Xiisayn loo muujiyay guryaha cusub ee goobta ka ag dhow dayactirkooda iyo sida loo heli karo
- Taageerooyinka iyo adeegyada kala duwan ee muhiimada u leh dadka dib-u-dejinta loo samaynayo

Waxaan isbuucyada soo socda dadka guryaha degan dib ugala soo wadaagi doonaa fikradihii nalala soo wadaagay.



Is-diiwaangeli si aad iimayl ugu hesho wixii soo cusboonaado oo aadan u seegin wararkii u dambeeyay Booqo **homes.vic.gov.au/sign-up**

- **Janaayo 2026** – Halkan waxaan u joognaa inaan kaaga jawaabno su'aalahaaga.
- **Febraayo 2026** – Adiga ayaan ku dhageysan doonaa si aan u fahano baahida bulshada.
- **Maarso 2026 – Abriil 2026 – May/Meey 2026** – **Si joogto ah ayaa bulshada wax kasta loola socod siin doonaa**
- **Juun 2026** – Xarumaha taageerka dib-u-dejinta iyo kuwa dib-u-dejinta ayaa furan.
- **Juulay 2026 – Febraayo 2028** – **Dadka guryaha kirada ugu jira ayaa laga caawin doonaa inay guuraan**

## Nagu xirnoow

**Kulamada la isku xog wareysanayo**

**Ra'yigii nalagula wadaagay kulamadii wadatashiga**

**Isdiiwaangeli si aad ula socoto wixii soo kordha**

Si aad wax kasta ula socoto booqo:

homes.vic.gov.au/north melbourne-precinct



nagala soco baraha bulshada raadi **Homes Victoria**

Waxaa oggolaaday oo daabacay Dowladda Victoria, 1 Treasury Place, Melbourne. © Gobolka Victoria, Homes Victoria, bisha Maajo 2026. (HV013326). Waxaa daabacay Finsbury Green, Melbourne Victoria, 3000.

More Homes For Victorians

VICTORIA State Government

# Wixii la socda North Melbourne

## Maajo 2026




### 159 Melrose Street

**Howlaha shaqo**

- Nadiifinta iyo rinjiyeynta jaranjarooyinka iyo meelaha laga dego si looga dhigo meelo ammaan ah oo aan lagu simbiririxanayn
- Fadlan raac calaamadaha badbaadada inta casriyeyntu socoto

**Marxaladda xigta ee dib-u-dhiska**

Waxaan halkaan u joognaa inaan dadka goobta degan, asxaabtoodaa iyo qoyskoodaba kala hadalno dib u dejinta la sameyn doono mustaqbalka.
*Kala soco waraaqaha darbiyada lagu soo dhajiyo wixii macluumaad ah ee ku saabsan maalmaha iyo waqtiyada la qabanayo kullamad*

### 33 Alfred Street

**Dadka ayaa waqti xaadirkan guuraya**

**Howlaha shaqo**

- Sugidda iyo samaynta guryo bannaan oo ammaan ah
- Waxyaabo qayb ka ah guryaha laga guuray ayaa laga saarayaa
- Albaabkii amniga ee la dhisayay oo la dhameeyay
- Muunado yar oo agab ah oo laga soo qaaday guryaha la faaruqiyay iyo hortooda

**Ballamaha Xafiiska Guryaha ee Xaafadaada**

Kooxda xafiiska guriyeynta ee xaafada waxaa hada laga heli karaa 12 Churchill Avenue, Ascot Vale.

Haddad rabtana waxaad la xiriiri kartaa kooxda North Melbourne:

- Sidii caadiga ahayd baad u wici kartaa ama iimayl ugu diri kartaa howlwadeenkaaga guryaha
- Xilli kasta iska imoow xafiiska Ascot Vale

### Agagaarka xaafada

- Qandaraaslayaasha iyo mas'uuliyiinta ayaa soo booqan doona goobta maalmo kala duwan si ay kormeeris u sameeyaan
- Hubinta isku xirka adeegga
- Sahanka dhulka ee badbaadada mustaqbalka ee agagaarka xuduudaha goobta

### 12 Sutton Street

**Dib u dhiska mustaqbalka**

- Howlo shaqo oo dayactir muhiim ah ayaa socda bisha Abriil 2026 ilaa bisha Diseembar 2026
- Shaqaaluhu waxay isticmaalayaan jaranjaro si ay u gaaraan meelaha kore ee darbiyada banaanka
- Shaqaalaha shaqada ka hayay qolalka hortooda, jaranjarooyinka, meelaha dharka lagu dhaqo laguna qalajisto

### 76 Canning Street

**Dib u dhiska mustaqbalka**

- Shaqooyin dayactir oo muhiimka ah ayaa la wadaa bisha Oktoobar 2025 ilaa bisha Juun 2026
- Shaqaaluhu waxay isticmaalayaan jaranjaro si ay u gaaraan meelaha kore ee darbiyada banaanka
- Shaqaalaha shaqada ka hayay qolalka hortooda, jaranjarooyinka, meelaha dharka lagu dhaqo laguna qalajisto
- Meelo wax lagu gooyay ayaa jiri doona si loo sugo ammaanka

### Beerta Bulshada ee Buncle Street

- Hawlo shaqo oo wax lagu dayactirayo ayaa socda
- Waxaa ku jira sariiro laga raray 33 Alfred Street
- Beeraha ayaa dib loo furi doonaa toddobaadyada soo socda

Shaqadayada waxaa haga saacadaha shaqada ee golaha deegaankaaga:

**Isniin ilaa Jimce**
inta u dhaxaysa 7am iyo 7pm

**Sabti**
inta u dhaxaysa 9-ka subaxnimo iyo 3-da galabnimo

Dadka goobta degan ee u baahan macluumaad dheeraad ah hala xidhiidhaan xafiiska guryaynta ee deegaankooda:

**1300 360 462**

**northmelbourne.housing@dffh.vic.gov.au**

Mararka qaarkood ogolaanshaha (permit) ay bixiyaan golaha deegaanka ayaa loo baahan yahay si looga shaqeeyo wax ka baxsan saacadahan laakiin dadka goobta degan waan la socod siin doonaa haddii ay tani dhacdo.

Dhammaan howlaha shaqooyinka waxaa lagu fulin doona heerarka ugu sarreeya ee badbaadada iyo shuruudaha sharciga.

## Waxa ka socda 33 Alfred Street

**Lama samaynayo dumin inta ay dadku wali degan yihiin dhismeyaalkan.**

### Waan kuu joognaa

- Diyaarinayo goobta iyo calaamadaha wax haga/tilmaamaya si loo sugo ammaanka goobta
- Hubinta isku xirka adeegga
- Dadka lugeynaya, baabuurta iyo baarkinada baabuurta oo amaan howlahooda ammaan laga dhigayo
- Howlo shaqo ayaa waxay ka socdaan gudaha dhismayaalka si amaana looga dhigo
- Waxyaabo yaryar oo guryaha ku dhagan ayaa laga fujin doonaa guryaha la faaruqiyay

### Duminta

- Rakibaadda biraha wax lagu dhisayo (scaffolding)
- Dhismaha marka si taxadar leh oo tartiib-tartiib ah loo burburinayo
- Si joogto ah in bulshada loola socodsiiyo wixii soo cusboonaada

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ay ku jiraan macluumaad ku qoran luqadaada booqo: **homes.vic.gov.au/information-in-your-language**

Wixii su'aalo guud ah iimayl u dir:

**enquiries@homes.vic.gov.au**